ABLE BODIED ADULT WITHOUT DEPENDENTS (ABAWD)

Shuruudaha U-qalmidda Cuntada Aasaasiga ah: Waxa Aad u Baahan Tahay in Aad Oggaato Si Aad Dheefahaaga u Yeelato

Basic Food Eligibility Requirements: What You Need to Know to Keep Your Benefits

Dheefahaagu waa kuwo waqtiga ku xaddidan soconaya haddii aadan shaqeynayn

Waxaan kuu tixgelinaynaa in aad tahay Qofka Wayn ee Awooda Jireed Leh Ee aan haysan Ku-tiirsanayaal (ABAWD) ee loogu talogalay Cuntada Aasaasiga ah sababtoo ah adiga waxaad awoodaa in aad shaqaysid wax carruur ahna gurigaaga kuma haysatid,

Waxaad qaadan kartaa dheefaha Cuntada Aasaasiga ah seddex jeer 36-dii biloodba haddii aadan kasoo bixin shuruudaha shaqada.

Sida aad u sii yeellan karto dheefahaaga Cuntada Aasaasiga ah

Waa in aad samaysid hal ama ka baddan oo hawlahaan soo socda kamid ah si aad u haysatid dheefahaaga wax ka baddan seddex bilood:

- Ka buuxi ama ka dhammee shaqada iskaada ah tooska barnaamijka shaqada kumeel gaarka ah bil kasta. Tirada dheeftaada bilaha ah waxay xadidaysaa tirada saacadaha ay khasab tahay in aad samaysid shaqada iskaada ah si aad u haysatid dheefahaaga cuntada.
- Shaqee ugu yaraan 20 saacadood todobaadkii ama 80 saacadood dhexdhexaadkii bishii.
- Kaqayb gal shaqaalaynta gobolka la oggolaaday ama barnaamijka tababarka sida:
  - Shaqaalaynta Cuntada Aasaasiga ah iyo Tababarka (BFET). Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo www.dshs.wa.gov/bfet;
  - Barnaamijyada waxaa lagu daray Hal-Abuurka Awooda shaqada iyo Qaanuunka Fursada (WIOA). Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo https://www.dshs.wa.gov/esa/community-services-offices/wioa; ama
  - AmeriCorps VISTA.

Caqabadaha horyaalla ka-qaybgalka

Nala soo xiriir haddii aadan awoodin in aad kaqayb qaadatid ugu yaraan 80 saacadood bishii sababtoo ah adiga:

- Waxaad tahay qof jir ahaan ama maskax ahaan naafo u ah;
- Waxaad qaadataa dheefaha ka ahaada Shaqo iyo Warshado (L&I), Maamulka Halyeeyada hore, ama caymis naafonimo khaas ah;
- Ku nool xaalad caqabad ku ah helitaanka ama qabashada shaqo;
- Waxaad daryeeshaa qof aanan asagu nafsadiisu daryeeli karin da' ama naafonimo darteeda;
- Waxaad kaqayb qaadataa daawayn ku tiirsanaan daroogo ama barnaamij baxnaanis;
- Waxaad codsatay ama qaadataa dheefaha shaqo la'aanta;
- Waxaad ku qorantahay iskuul ugu yaraan maalinta-barkeeda ah; ama
- Qaata dheefaha Gargaarka Kaashka ee Qaxootiga ama Maaliyadaha Deeqda ee Waafaqsan; ama
- Ka-qaybgala Dhabbaha LEP ama barnaamijka CLEVER.

Waxyaabaha ay tahay in aad soo sheegto

Waa in aad noo soo sheegtid haddii:

- Aadan dhammayn karin tirada saacadaha kaqayb galka bishii.
- Ay shaqadaadu ka hoos marto 20 saacadood todobaadkii.
- Dakhliga qoyska reerkaaga soo galaya wuu ka baddan yahay xadka ku qoran WAC 388-478-0060.
- Adiga ama xubin ka tirsan qoyskaaga ayaa ku guuleystay lacag badan oo bakhtiyaa-nasiib ama khamaar ah oo hal ciyaar gudaheeda lagu helay, taas oo la eg ama ka badan xadka lagu qeexay WAC 388-470-0006(8)(a).

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha ABAWD ka heli kartaa www.dshs.wa.gov/abawd.

Naga soo wac lambarkan 1-877-501-2233 haddii aad qabtid su'aalo, u baahantahay caawimaad laguugu xiro barnaamijka tababarka, ama u baahantahay in aad soo sheegtid isbedelo.

Waxaad nagu soo booqan kartaa www.washingtonconnection.org si aad u codsato dheefo, u gudbiso dib-u-eegis, ama isbeddellada warbixinta.